



JAMHUURIYADDA FEDARAALKA SOOMAALIYA  
HAY'ADDA MAAREYNTA  
MASIIBOYINKA SOOMAALIYEED (SODMA)  
XARUNTA QARAN EE KA DIGISTA HALIS-WADAREEDKA

## SAADAASHA ROOBKA XILLIGA DEYRTA

(4th to 11th Oct)-2023

Roobab camirkooda iskugu jiro dhex-dhexaad ah iyo kuwo culus ayaa la filayaa inay ka da'aan qeybo ka mid ah Gobalada Dalka Sida **Gedo, Bay, Bakool and Hiraan, Mudug and Galgaduud, Sool, Sanaag and Bari.**

HADII AAN DIB U EEGNO ROOBKII TODOBAADKII HORE EE MUDDADA 27KA SEPTEMBER ILAA 5TA OKTOOBAR 2023

Asbuucii la soo dhaafay, qaybo badan oo ka mid ah koonfurta Dalka ayaa helay roobab aad u xoogan oo meelaha qaar sida magaalada Baydhabo cabirkoodu ay gaareen (179.7 mm) taasoo ay ka dhalatay daadad xooggan oo gudaha magaalada ah.

Sidoo kale roobaba xoogan oo cabirkoodu gaaro (123 mm) ayaa ka da'ay magaalada Luuq waxayna sababeen daadad kooban ay ku soo rogmadeen beeraha ku dhow dhow. Qaybaha kale ee laga diiwaan geliyey roobka laxaadka leh ee in ka badan 30 mm waxaa ka mid ah Ruqi (40 mm) gobolka Awdal, Garoowe (38.1 mm) gobolka Nugaal, Xeege (35 mm) gobolka Awdal, Buulo Burte (34.5 mm) ee gobolka Hiiraan, Ceel. Afweyn (33 mm) ee Gobalka Sanaag, Dhubato (30 mm) ee gobalka Waqooyi-Galbeed (Graph 1). Waxaa jiray warar sheegaya daadad xooggan oo ka dhacay Mahadaay Weyne oo ay sabab u tahay roobab dhexdhexaad ah oo helay 5-tii Oktoobar 2023.

Waxaa asbuucii la soo dhaafay Kor u kacay heerka biyaha labada webi ee Jubba iyo Shabeelle roobabkii ka da'ay gudaha dalka iyo buuraleyda Itoobiya. Heerka biyaha wabiga shabeelle ee sare u kacaya ayaa sababay Burbur aad u fara badan ee toolada barxada Sabuun magaalada Mahadaay 2-dii Oktoobar 2023. Sidii dhacday bishii Maarso 2023, burburkaan wuxuu caqabad ku noqonkaraa socodka biyaha webiga oo u noqonkara sidii biyo-xireen deeganadaas u horseeda fatahaad aan la filayn. Hadii aan si degdega ah loo qodin loogana saarin qashinkaas ka hor inta aanu heerka webigu kor u kicin, taas oo ka dhigaysa mid adag in la hirgeliyo.

2dii Oktoobar 2023, FAO SWALIM ayaa soo saartay khariidado iyo xog-ururinta juquraafiga kuwaas oo 170 goobood oo furfuran lagu ogaaday hareeraha wabiga Shabeelle iyo 26 ee ku teedsan webiga Jubba. Waxa kale oo la ogaaday 56 goobood oo kanaalka ah iyo 168 goobood oo buuxdhaafay.

Dhammaan calaamadaha khataraha waxay u baahan yihiin tallaabo degdeg ah. **SoDMA iyo FAO SWAIM** waxa ay sidoo kale samayseen oo ay faafiyeen khariirado, xog-ururin iyo talabixino ku saabsan meelaha sare ee suurtoogalka ah ee laga bixi karo haddii ay fatahaad ka dhacdo labada webi.

## SAADAASHA ROOBKA XILLIGA DEYRTA (4TH TO 11TH OCT)-2023

Roobab cabirkoodu u dhexeeyo 50 iyo 100 mm ayaa la saadaalinayaa inay ka da'i doonaan **bariga gobolka Bakool** gaar ahaan Tayeeglow; **waqooyiga gobolka Baay**, iyo deegaano dhowr ah oo ka tirsan **gobolka Hiiraan gaar ahaan Beled Weyne, Maxaas, iyo Matabaan** (Khariidadda koowaad ka muuqata). Roobab la mid ah ayaa sidoo kale laga yaabaa inay ka da'aan **degmada Jariiban ee Mudug, degmada Xasbahaale ee Nugaal, iyo Laas Caanon, Xudun, iyo Taleex ee Sool**. Roobabku waxa ay u badan tahay in ay u faafo oo ay ku xoogaystaan **Baay, Hiiraan, Mudug iyo Nugaal** waxana ay ka da'ayaan intii la saadaaliyay ilaa 100mm.

Meelaha kale ee la saadaalinayo in ay heli doonaan roobab fiican waxaa ka mid ah **Garadag, Dhahar, iyo Buran oo ka tirsan gobolka Sanaag, Qardho iyo Dangoroyo oo ka tirsan gobolka Bari, Buuhoodle, Balidhiig, iyo Waraabeeye oo ka tirsan gobolka Togdheer.**

1

WIXII FAAH FAAHIN DHEERI AH  
FADLAN NAGALA SOOXIIRIIR



+252 615 468642  
+252 615 468642



www.sodma.gov.so  
www.sodma.gov.so



Communications@sodma.gov.so  
Communications@sodma.gov.so



Wadajir District, Danwadaagta-Airport Road  
Mogadishu-Somalia

Roobab cabirkoodu ka yaryahay 50 mm ayaa la filayaa in ay ka da'aan meelo badan oo ka mid ah dalka. Ku waas waxaa ku jira Burco, Beer, and Xaaji Saalax oo ka tirsan Gobolka Togdheer; Caynabo, Waridaad, iyo Yagoori oo ka tirsan gobolka Sool; Ceerigaabo iyo Ceel Afweyne oo ka tirsan gobolka Sanaag; Degmooyinka Ufayn, Ballidhig, iyo Bandar Beyla ee gobolka Bari; Degmooyinka Garoowe iyo Burtinle ee gobolka Nugaal; qaybo badan oo ka mid ah gobolka Mudug; Degmooyin ka tirsan gobolka Galgaduud, gaar ahaan agagaarka Dhuusamarreeb, Cadaado, iyo degmada Caabudwaaq; Aadan Yabaal iyo Jowhar oo ka wada tirsan gobolka Shabeellaha Dhexe; Degmada Wanla-Weyne ee Gobolka Shabeellaha Hoose; deegaanada ku teedsan Baydhabo iyo Qansaxdheere ee gobolka Baay; Deegaannada ku teedsan Luuq iyo Baardheere ee gobolka Gedo, iyo sidoo kale deegaanno ku xeeran degmooyinka Jamaame, Kismaayo, iyo Badhaadhe ee gobolka Jubbada Hoose.


Xaalado qalalan oo aan roob la'aan ayaa laga yaabaa inay wajahaan dhul ballaaran oo ka tirsan gobolka Awdal, gobolka Woqooyi Galbeed, galbeedka iyo waqooyiga gobolka Togdheer, iyo sidoo kale xeebaha iyo galbeedka gobolka Sanaag, xeebaha iyo waqooyi-galbeed ee gobolka Bari, degmada Gaalkacayo iyo xeebaha koonfureed ee gobolka Mudug, qaybo ka mid ah xeebaha gobolka Galgaduud, iyo xeebaha labada gobol ee Shabeellada Hoose iyo Shabeellada Dhexe iyo sidoo kale gobolka Banaadir, koonfurta gobolka Baay, waqooyiga iyo galbeedka gobolka Gedo, iyo dhul badan oo ka tirsan Jubbada Hoose iyo Jubbada Dhexe.

### Haadaasha Heerkulka (Temperature Forecast)

Qeybaha Waqooyi-galbeed ee gobollada Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe, xeebaha gobolka Bari, bartamaha gobolka Sool, iyo sidoo kale xeebaha gobollada Awdal iyo Woqooyi Galbeed, ayaa laga yaabaa in heerkul sare oo u dhexeeya 35 °C iyo 45°C. Inta badan qaybaha kale ee dalka waxay u badan tahay inay sii ahaadaan heerkul dhexdhexaad ah oo u dhexeeya 25 °C iyo 35 °C Saadaasha Dusha sare dabaysha (Surface (10 m)

### Wind Forecast)

Waxaa jirta suurto galnimo sare (70%) oogada sare (10 m) dabayl ka badan 20 garaac (10 m/s) oo ka kor mari doonta xeebaha waqooyi bari oo ay ku jiraan degmooyinka Jariiban iyo Eyl ee gobolka Nugaal iyo degmooyinka Bandarbeyla iyo Iskushuban ee gobolka Bari inta u dhaxaysa 3pm iyo 9 pm wakhtiga maxaliga ah ee xilliga saadaasha.




Map 1: Saadaasha wadarta roobabka Soomaaliya inta u dhaxaysa 4-ta iyo 10-ka Oktoobar 2023


## Xaalada Heerka wabiga hada (Current River Levels)

Kor u kaca heerka biyaha webiyada Jubba iyo Shabeelle oo ay sababeen roobabkii xooganaa ee ka da'ay gudaha dalka iyo buuraleyda Itoobiya ayaa laga dareemay dagmooyinka Doolow, Luuq iyo Baardheere ee ku teedsan webiga Jubba, Roobabkii mahiigaanka ahaa ee da'ay habeenimadii 4tii Oktoobar 2023 ayaa sababay kor u kac aad u xoogan (2.12 m) ee Luuq taas oo dhaaftay heerka halista fatahaada dhexdhexaadka ah (5.5 m). Degmada Buulle, roobab maxali ah oo is xigxigay todobaadkii la soo dhaafay ayaa horseeday sare u kac weyn oo ah heerarka webigga laakiin weli ka hooseeya celceliska muddada gaaban iyo heerarka 2022. Degmooyinka Beled-Weyne, Buulo Burte iyo Jowhar ee ku teedsan webiga Shabeelle, heerka webigu wuxuu dhaafay celceliska muddada gaaban iyo heerarkii 2022.

Sawrika 1 and 2 Muujinta heerarka webiyada ee hadda jira oo ka soo horjeeda celceliska muddada gaaban iyo heerarka 2022 ee heerarka Beled Weyne iyo Luuq siday u kala horreeyaan.



Garaafka 1: Roobab isbiirsaday (mm) ayaa lagu arkay heerarka kala duwan intii u dhaxaysay 27-kii Sebtember iyo 5tii Oktoobar 2023 ee Soomaaliya oo dhan



Sawrika 1: Heerka webiga Shabeelle ee heerka Beled Weyne wuxuu ahaa 5-tii Oktoobar 2023




Figure 2: Heerarka webiga Jubba ee Luuq Station sida 5-ta Okt 2023

## SAAMAYNTA LA XIDHIIDHA SAADAASHA ASBUUC AH

Marka loo eego miisaanka iyo xoogga, roobabka loo saadaaliyay buuralayda Itoobiya, iyo roobab maxalli ah oo ka da'aya dhulka webiyada ee dalka waxaa la filayaa in ay horseedaan qoyaan badan iyo si degdeg ah ugu qulqulaan webiyada.

Sidaa darteed, heerarka biyaha ee Jubba iyo Shabeelle ayaa la saadaalinayaa inay sare u sii kacaan oo gaarayaan heerka khatarta fatahaadda laga bilaabo toddobaadka saddexaad ee Oktoobar. Si kastaba ha ahaatee, haddii aan laga qaadin qashinka iyo wasakhda ku urursan barxadda Sabuun horteeda, waxa caqabad ku noqonkartaa qulqulka webiga oo u noqda sidii biyo-xireen oo horseeday fatahaad aan la qisaari Karin. Roobabka ka da'aya gobolka Bay ayaa laga yaabaa in ay sii dheereeyaan khatarta fatahaadda roobabka ee meelaha nugul gaar ahaan magaalada Baydhabo. Iyadoo lagu salaynayo saadaasha iyo wixii hore dhacay 4-tii bishaan, waxaa sidoo kale jirta khatar ka iman karta daadad ku soo rogmado meelaha jilicsan ee degmooyinka Burtinle iyo Garoowe. Bulshada ku dhaqan agagaarka webiyadan waxaa lagula talinayaa in ay feejignaadaan oo ay u diyaar garoobaan khatarta ka imaan karta fatahaadda wabiyada. Waxaa kaloo lagu talinayaa in ay dhagaysaan una dhaga nuglaadaan fariihama digininaha ee soo baxaya, ayna qaadaan taloobo kasta oo ka hor tag ah, gaar ahaan meelaha nugul.

Saadaasha roobabka fiican ee dalka, waxay fursad u siinayaan bulshada beeralayda ah diyaarinta dhulka iyo beerista si ay kor ugu qaadaan hab-nololeedkooda. Saadaasha roobabka toddobaadlaha ah waxay u horseedi doontaa dib-u-kordhinta ilaha biyaha, buuxinta heerarka biyo-qabsiga, iyo hagaajinta xaaladaha ciidda. Xaaladahan waxay ku fiican tahay banaynta dhulka hab-nololeedyada beero-iyo-xoolo dhaqatada leh waxayna calaamad u tahay bilowga beerista. Waxaa intaa dheer, saadaasha heerkulka dhexdhexaadka ah (25 °C iyo 35 °C), waxay u badan tahay inay u horseeddo xaalad ciid diiran oo ku habboon beerashada. Si kastaba ha ahaatee, heerkulka dhexdhexaadka ah ee ka sarreeya 35°C) ee gobollada Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe, xeebaha gobolka Bari, bartamaha gobolka Sool, iyo sidoo kale xeebaha gobolka Awdal iyo Woqooyi Galbeed waxay keeni kartaa uumi badan. Saadaasha hawada sare ee dabayshu waxay ka sii dari doontaa uumi-baxa waxayna sidoo kale kor u qaadi doontaa carro dabacsan taasoo horseedi doonta xaalad boodh ah oo ka dhacda xeebaha waqooyi bari oo ay ku jiraan degmooyinka Jariiban iyo Eyl ee gobolka Nugaal iyo degmooyinka Bandarbeyla iyo Iskushuban ee gobolka Bari.